



Ogaado).

Diiradda saarista Badqabka iyo Ammaanka dhanka Jirka iyo Dareenkaba ah ee Ardayga: Marka laga tago taageerada tacliinta, degmadu waxay sidoo kale diiradda saartay xaqiijinta in ardaydeenu, khaasatan kuwa la kulmay dhibaataada ama uurkutaalada, ay helaan jawi ammaan ah iyo kaalmo dhammaystiran. Waxaan sii wadaynaa inaan ardayda iyo qoysaska kala shaqayno dib u naqshadaynta goobaha, xoojinta kaalmada badqabka, iyo kala qaybqaadashada bulshada kaalmada dhamaystiran ee badqabka jirka iyo kan dareenka.

## **2A. Ka hadal ugu yaraan hal Natiijo oo aad ka aragto in caqabado ama dhibaatooyin kajiraan meelmarinteeda.**

Inkasta oo uu jiro horumar dhiirgalin leh, haddana arday fara badan ayaan wali gaarin halkii ay u baahnaayeen iany gaaraan. Waa inaan dardargalinaa waxbarashada ardayda muhiimka ah, khaasatan kuwa Madow, Maariinka ah, iyo kuwa Asalka ah. Firaq dhanka guusha ah oo soo laalaabanaya ayaa kajira guud ahaanba isirada, qolada, waxbarashada gaarka ah, iyo xaaladaha ardayda barata

talaabo kasta oo suurtagal ah si aan u yarayno gaabiska sannadka soo socda aanna u maalgashano aradydeena iyo macalimiinteena.

Maalgalinta dheeraadka ah ee gobolku waxay bixin doontaa taageero muhiim ah si maalgashiyada muhiimka ah ay u waaraan, sida horumarka macalinka xirfadlaha ah, ayada oo la meelmarinayo Habka Waxbarashada PPS, sare u qaadista wax akhriska, iyo bixinta adeegyo qorshaysan oo ku slaaysan Nidaamka Qaybaha badan ee Taageerada ah (MTSS). Sidoo kale waa inaan sare u qadnaa taageerooyinkeena guud ee badqabka iyo ammaanka jireed iyo maskaxeed ee ardaydeena iyo qoysaskeena ay samaaysay uurkutaalada iyo dhibaataada bulshadeena dhexdeeda ah.